Somaliska



MACLUUMAADKA KU SAABSN

# Waalidka iyo caafimaadka ilmaha

Waalidka iyo caafimaadka ilmaha, aqoonyahanada dhinaca cilmi nafsiga iyo arimaha bulshada waxay ka shaqeeyaan sidii kor loogu qaadi lahaa caafimaadka maskaxda ee looga hortagi lahaa xanuunada dhimirka ee waalidka cusub caruurta da'doodu u dhaxayso 0-6 iyo waalidkood.

## Waxaan halkan u joognaa inaan kaa caawino

- Daawaynta saxda ah ee welwelka, walbahaarka ama iskubuuqa la xidhiidha uurka ama kadib marka ilmuhu dhasho.
- Daawaynta cabsida laga qabo dhalashada ilmaha.
- Taageerada waalidnimada.
- Taageerada inta uurku jiro.
- Daawaynta saxda ah ee u dhaxaysa ilmaha iyo waalidka.
- Latallinta cilmi nafsiyadeed ee ilmaha.
- Qiimaynta cilmi nafsiyadeed ee ilmaha.

Kadib qiimaynta hore dhakhtarku wuxuu go'aamiyay latallinta waalidka(waalidiinta) kaasoo kaalmaddu ay ugu habboon tahay. Booqashooyinku waa bilaash.

## Nalasoo xidhiidh

Haddii arimuhu aanay la xidhiidhin wax ku saabsan waalidnimadaada, haddii ay yihiin wax muddo dheer soo jiray ama aad u balaadhan ka raadso daawo xaruntaada caafimaad ee goobta kuugu dhaw.

Haddii aad rabto inaad nala soo xidhiidho wixii tallo ah, waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa telefoonka 063-15 36 07.

Saacadaha telefoonku waa Salaasada iyo Jimcaha inta u dhaxaysa 8.15-9.00.

## Waxaad naga heli kartaa halkan

Waalidka iyo caafimaadka ilmaha waxa laga heli karaa Köpmangatan 24, floor 5 in Östersund.



## HADDII AY JIRAAN DHIBAATOOYIN KUSOO BOODA AH

Haddii aad waajahayso dhibaatooyin soo boodo ah waxaad u baahan doontaa inaad raadiso caawimo aad ka hesho waadhka gargaarka degdeg ah ee dhakhtarka dhimirka adigoo ka wacaya telefoonka 063-15 32 50. Haddii ay jiraan arimo naftaada halis galinaya, wac 112.

Sawirada: Mostphots. Sawirada waxaa loo isticmaalaa kaliya ujeedada sawirada iyo dhammaan dadka sawirada ku jira waa dad xayaysiinaya. 231106